

Ibb Ma Galo

FAAFIN  
الرسمية



RASMI AH  
الجريدة

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad

Muqdisho, 10 Junyo 1975

L. 1, R. 6

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilahmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### BOGGA KOWAAD

#### SHARCI

- SHARCI L. 38, Tr. 4 Junyo 1975 — *Toosin ku saabsan Sharciga L. 52 ee Junyo 1972ka.* Bog. 478
- SHARCI L. 39, Tr. 7 Junyo 1975 — *Meel-Marin Heshiis Amaaheed oo dhexmaray Soomaaliya iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika.* » 481
- LAW N. 39 of 7 June 1975 — *Ratification of Agreement between the Somali Democratic Republic and African Development Bank.* » 482
- SHARCI L. 40, Tr. 7 Junyo 1975 — *Meel-Marin Heshiis Dhexmaray Soomaaliyo iyo Ururka Horumarinta Addunka (I.D.A.) oo ku Saabsan Mashruuca Ballarinta Dekedda Muqdisho.* » 483
- LAW N. 40 of 7 June 1975 — *Ratification of Agreement between the Government of Somalia and International Development Association (IDA).* » 484

- SHARCI L. 41, Tr. 7 Junyo 1975 — *Meel-Marin Heshiis Dhexmaray Soomaaliya iyo Boqortooyada Sacuudi Carabya.* » 485
- SHARCI L. 41, Tr. 7 Junyo 1975 — *Nuqul Carabya. laha Dawladda.* Bog. 486  
» 487

---

## BOGGA LABAAD

### XEER:

- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 25 Majio 1975, L. 80 — *Magacaabidda Gud-doomiyeyaasha Gobollada Galgaduud iyo Mudug Sh. Dhexe iyo Nugaal.* Bog. 491
- XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 28 Abbril 1975, L. 81 — *Magacaabid Guddiyada Kacaanka Gobolka Sh. Hoose.* » 492
- XEER WASARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 24 Majiyo 1975, L. 82 — *Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee G. Bakool.* » 495
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 19 Oktoobar 1967, L. 83 — *Concessione di area di Terreno demaniale a favore dei Sigg.ri Abdullahi Mohamed e Farah Sugulle.* » 498
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Majiyo 1975, L. 84 — *Dhul Dowladeed la siiyay gacantana loo geliyay J. Sheekh Xasan Hamuud Cabdi.* » 499
-

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOPYIN ISGARSIIN OGEYSII IYO WIXII LA MID AH

---

- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 4 Juunyo  
1975, — *Buugga Lacagta L. 3226-4, Shs. So. 2.098 ay  
ledahay Xadiya Nuur Kaahiye. (93)* Bog. 500
- NUCLEARE SOMALA S.p.A., Tr. 20 Majio 1975 — *Ururka  
Maamulka Shirkadda Nucleare Somala S.p.A. (94)* » 501
- NUCLEARE SOMALA S.p.A., Tr. 20 Maajio 1975 — *Con-  
siglio di Amministrazione della Nucleare Somala S.p.A.  
(94)* » 501
- SOMALI AIRYINES S.p.A., Tr. 15 Junyo 1975 — *Avviso  
di Convocazione di Assemblea Ordinaria. (95)* » 502
- MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, Tr. 15 Junyo  
1975 — *Jeeqga warxga L. 25 qor kuna qorantohay lacag  
Shs. So. 11.000. Leeyohay Moxamuud Yusuf Cilmi Jaa-  
mac. (95 Ku celi)* » 503
- SAXID » 504
-

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 38, Tr. 4 Junyo 1975.

Toosin ku saabsan Sharciga Lambar 52 ee Jun 1972ka.

### GUDDOONSHAHA

#### GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambar 52 ee soo baxay 8 Juun 1972kii;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in la too-siyo iyo wax lagu kordhiyo sharciga kor ku qoran ee ku saabsan nidaaminta Dawladda Hoose;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii ay u soo jeediyeen Xoghayeyasha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Garsoorka iyo Diinta;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayeyaasha Dawladda;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Kordhin qodobka cusub 19 A*

Waxaa sharciga lamb. 52 ee soo baxay 8-6-1972kii, lagu kordhina-yaa qodobka cusub ee lambarkiisu noqon doono 19A. Wuxuuna ahaan doonaa sida hoos ku qoran:

Qodobka 19 A

*Awoodda Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka*

1. Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay awood u leeyihiin inay metalaan Dawladda oo dhan hay'adaha Dawladda ee kala geddisan oo jooga Gobollada iyo Degmooyinka waxay hoos imaanayaan Guddiyadaas.

2. Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay massu'uul uga yihiin Wasaaradaha iyo Hay'adaha madax bannaan habeynta maamulka guud, fulinta iyo hirgelinta go'aannada Dawladda Dhexe.

3. Dallacaadda Shaqaalaha Dawladda waa inay ku xidhantaa warbixinta Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka.

#### Qodobka 2aad

Qodobka 30aad qaybta 1aad ee sharciga lambar, 52 ee 8-6-1972kii waxaa lagu kordhiyay xuruufta (III), iyo (IV) oo ah sida soo socota:

III. Wasaaradaha iyo Hay'adaha Madax bannaan, waxay Dawladda Hoose ee Gobollada iyo Degmooyinka ku wareejinayaan:

b) Mushaharooyinka Shaqaalaha Dawladda oo dhan;

t) Kharajka caadiga ah ee ku baxa Gobollada iyo Degmooyinka oo dhan oo aan ahayn midka ku saabsan mashruucyada gaarka ah, waxaa loo gudbinayaa Dawladda Hoose ee shaqada ku leh;

IV. Wasaarad ama Hay'ad waliba waa inay sannadka horaantiisa u gudbisaa Gobollada iyo Degmooyinka awood kharash (Warrant) lacagta looga baahan yahay (b) iyo (t) kor ku sheegan.

#### Qodobka 3aad

##### *Dhismaha Guddiyada*

Qodobka 21 (1) (f) ee sharciga lambar 52 ee soo baxay 8-6-1972 waa la tirtiray, waxaana lagu beddelay sida soo socota:

(f) Guddiga Hoose (Committee) ee dhexdhexaadinta heshiisinta arrimaha Caddaaladda. Guddiga Hoose (Committee) waxay soo dhexgelayaan wixii khilaaf ah ee dhexmara xubnaha Dadweynaha, iyadoo ku dadaalaya sida u heshiisin lahaayeen dadka khilaafku dhexmaray. Guddiga Hoose (Committee) waxay awood u leeyihiin inay talaabo asluubeed ka qaataan wixii u baahan.

Guddiga waxay kaloo fiiro gaara ah siinayaan siday caddaaladdu guud ahaan uga hirgelayso Gobolka ama Degmada ayagoo la socodsiiinaya Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, hase yeeshee marna ma fara gelinkaraan Go'aannada ka soo baxa Maxkamaddaha, waxayna soo gaarsiiinayaan Guddiga Sare (Council) wixii ay la tahay inay habboon tahay inay Guddiga Sare (Council) ogaadaan.

#### Qodobka 4aad

##### *Fadhiyada*

Qodobka 25aad xubinta 1 (koowaad) ee sharciga nidaaminta Dawladda Hoose waa la baabi'iyey, waxaana lagu beddelay inta soo socota:

1. Guddiyada Kacaanka ee Gobolladu waxay u fadhisanayaan shirkooda caadiga ah oo ay ka soo qayb galaan xubnaha jooga oo dhammi, tiradooduna ku filaato fadhiga bishiiba mar, iyo shir guud oo caadi ah oo ay ka soo qayb galaan madaxda Dawladda oo dhan iyo xubnaha ka leba seddexdii bilood mar.

Guddiga Kacaanka ee Degmadu waxay shirkooda caadiga ah fadhisanayaan bishiiba mar.

V. Waxaa ka reeban mushaharooyinka shaqaalaha iyo kharashka kale ee Wasaaraddaha, Wakaaladaha ka dhisan Gobollada iyo Degmooyinka oo aan maamulkooda Xamar laga xukumin. oo aan maamulkooda Xamar laga xukumin.

Qodobka 5aad

*Tirtir*

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigaan waa la tirtiray.

Qodobka 6aad

*Dhaqan gelid*

Sharciga kan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, waxuuna dhaqan gelayaa maalinta uu ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 4 Juunyo 1975.

GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

SHARCI L. 39, Tr. 7 Junyo 1975.

Meel-Marin heshiis amaaheed oo dhexmaray Soomaaliya iyo sanduuqa Horumarinta Afrika.

GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYA9

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmaryey Hehsiiska ka dhexeeya Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kaasoo ku saabsan qalabka dib-u-samaynta iyo daryeelidda jidadka Soomaaliya, lacagtiisuna dhantahay 3 milyuun oo dollar iyadoo dulsocodka la bixinayaa uu yahay seddex dalcool hal boqolkiiba (3/4 of 1 per cent) sannadkiiba.

Qodobka 2aad

Heshiiska kor ku tilmaamaan wuxuu yeelan doonaa astaan sharci, waxaanu ka mid noqon doonaa sharciyada lagaga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4 Juunyo 1975.

LAW No. 39 of 7 June, 1975.

Ratification of Agreement between the Somali Democratic Republic and African Development Bank.

THE PRESIDENT  
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The 1st and 2nd Cartters of the 21 Octobar 1969 Revolution.

HAVING SEEN The Decision of the Supreme Revolutionary Council.

HEREBY PROMULGATES

The following Law:

Art. 1

The Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Developpment Bank equipment and facilities for the repair and maintenance of the road Network in Somalia is hereby Ratified. The money required for this project is 3 three million Dollars with an interest rate at  $\frac{3}{4}$  of 1% a year.

Art. 2

The above mentioned Agreement shall have the force of law in the territory of the Republic and shall form Part of the Laws of this Republic.

Art. 3

This Law shall come into force immediately. It is signed by the President of the Supreme Revolutionary Council.

Mogadishu, 7 June 1975.

THE PRESIDENT  
of the Supreme Revolutionary Council



SHARCI L. 40, Tr. 7 Juunyo 1975.

Meelmarin Heshiis Dhexmaray Soomaaliya iyo Ururka Horumarinta Addunka (I.D.A.) oo ku Saabsan Mashruuca Ballaarinta Dekedda Muqdisho.

GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska ka dhexeeya Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Ururka Horumarinta Addunka (I.D.A.) oo ku saabsan Mashruuca Ballaarinta Dekedda Muqdisho.

Qodobka 2aad

Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu yeelan doonaa astaan sharci, waxaanu ka mid noqon doonaa sharciyada lagaga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faa'inta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 7 Juunyo 1975.

GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

LAW No. 40 of 7 June 1975.

Ratification of Agreement between the Government of Somalia and International Development Association (IDA).

THE PRESIDENT  
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The 1st and 2nd Charter of the 21 October 1969 Revolution.

HAVING SEEN The decision of the Supreme Revolutionary Council.

HEREBY PROMULGATES

The following Law:

Art. 1

The Agreement Concerning the extension of the Port of Mogadishu between the Government of the Democratic Republic of Somalia and the International Development Association is ratified.

Art. 2

The above mentioned Agreement will have the full force of the Law and will form Part of the Laws of the Somali Democratic Republic.

Art. 3

This Law will come into force immediately, it is signed by the President of the Supreme Revolutionary Council.

Mogadishu, 7 June 1975.

PRESIDENT  
of the Supreme Revolutionary Council  
*Major Gen. Maxamed Siyad Barre*

SHARCI L. 41, Tr. 7 Juunyo 1975.

Meelmarin Heshiis Dhexemaray Soomaaliya iyo Boqortoyada Sacuudi Caraabya.

GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Go'ankii Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyey Heshiiska ka dhexeeya Jamhuuriyadda Dimooqradiga Soomaaliya iyo Boqortooyada Sacuudi Caraabya, kaasoo ay Boqortooyada Sacuudi Caarabiya ku siinayso Soomaaliya amaah dhan 28 malyuun oo doolar oo sharuudaha ku xidhani ay yihiin kuwa hoos ku qoran:

- a) In aanay jirin wax dulsocod ah;
- b) In muddada amaahda lagu bixinayaa ay ahay 10 sano;
- t) In bixinta amaahdu ay bilaabanto 4 sano (4years grace period) kabiid marka heshiisku dhaqan galo.

Qodobka 2aad

Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu yeelan doonaa astaan sharci, ka mid noqon doonaa sharciyada lagaga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla marka uu saxiixo Madaxwey naha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 7 Juunyo 1975.

## تصديق على الاتفاقية المبرمة بين

جمهورية الصومال الديمقراطية والمملكة العربية السعودية

رئيس المجلس الاعلى للثورة

بعد الاطلاع على الميثاق الاول والثانى للثورة ٢١ اكتوبر ١٩٦٩م على القانون رقم ١

بعد الاطلاع على الاتفاقية المبرمة في رياض بتاريخ ٢٠/٥/١٩٧٥م بين الجمهورية الصومالية الديمقراطية وحكومة المملكة العربية السعودية .

وتنظرا لقرار المجلس الاعلى للثورة ومجلس سكرتيرى الدولة .

يصدر

القانون التالى :

لقد تم التصديق على اتفاقية بمقتضاها تقدم حكومة المملكة العربية السعودية الى الصومال قرضا مقداره ٢٨ مليون دولار ، وتلك الاتفاقية قد أبرمت في رياض بتاريخ ٩/٥/٣٩٥ هـ الموافق ٢٠/٥/١٩٧٥م بحيث يكون تسديد القرض على الشروط التالية :

- ١ - على أن يتسدد القرض في حدود عشر سنوات .
  - ٢ - على أن تبدأ تسديد القرض بعد أربعة سنوات بعد ان تصبح الاتفاقية سارية المفعول بين البلدين .
  - ٣ - على ألا يفرض أى قيود أو فائدة على تسديد القرض .
- تكون الاتفاقية لها صفة شرعية في جمهورية الصومال الديمقراطية

مادة : ٢

يسرى مفعول سريان هذا القانون ابتداء من تاريخ امضائه عليه الرئيس الاعلى لجلس الثورة وينشر في الجريدة الرسمية للدولة .  
مقديشو في ٧ - ٦ - ١٩٧٥م

جالى اللواء محمد سياد بري رئيس المجلس الاعلى للثورة

SHARCI L. 42, Tr. 7 Juunyo 1975.  
Habka Maamulka Xoolaha Dawladda.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo  
kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Haddii si kale aani oo micneyn, erayada hoos ku qoren waxaa ula-  
jeeddadooda noqoneysaa sida soo socda:

DAWLADDA AMA HAYADDA Waxaa loola jeeda Dawladda  
Dhexe, Dawladda Hoose Wakaalad, ama Mashruuc ay qeyb ku leeyihiin  
hayadaha tilmaaman.

HANTIDA DAWLADDA Waxaa loola jeedaa, wax alla wixii lacag  
ah ama waraaqo lacag u dhigmi kara iyo wixii hanta ah oo ku micneysan  
qodobadda 4, 5, 6, iyo 7 ee xeerka lam. 318 taarikh. 18-12-62 ee ku  
saabsan xannaanadda Xoolasha Dawladda.

WARAAQO LACAGEED Waxaa loola jeedaa waraaqaha ee rasmi-  
ga ah ee lacag u dhigma «jeegaga» (assegni bancari) ama lagu amro lacag  
bixin (ordine di pagamento) iyo wixii la mid ah.

XAAS Labada qof ee isqaba ama caruurta ka harta (ptrees families).

QOF HUFAN Waxaa loola jeeda qof nadiif ah ee aan u muuqan  
qof sameyn kara waxyqlaha lid ku ah bulshada Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Waraaqaha lacagta ama hantida Dawladda oo la bixinaayo ama laga  
saarayo qasnadda Dawladda waa ineey wadasaxiixaan ugu yaraan laba  
qof.

Qodobka 3aad

1. Lacagta Dawladda loo qabto waa in maalin kasta lagu waree-  
jiyo khasnadda Dawladda (treasury) ama Bankiga.

2. Meesha aan khasnad Dawladeed laheyn ama Banki, iyadoo la  
tixgelinaya tirada lacagta, waa in laga qabto gaar adag inta laga gaarsii-  
nayo lacagtaas Bnkiga ama khasnadda Dawladda.

#### Qodobka 4aad

1. Wax alla wixii alaaba ah oo Dawladda ama xubnaheeda loo soo qaadayo waa in Guddi loo xil saaraa.

2. Looma oggola in qof keligii soo qaado alaabta Dawladda ama xubnaheeda ay u baahan yihiin.

3. Marka aloobta la soo qaado ee maqaasiinka la keeno waa dii-waanka la geliyo, iyadoo lagu qoraayo taarikhda la keenay alaabtaas, tira-deeda ama cabirkeeda, qiimaheeda iyo waxii kale ee tilmaana oo looga baahanyahay.

4. Waxii ka xumaada alaabtaas waa in la sameeyaa guddi Dii-waanka ka saaraa sanadkiiba mar (annual of survey).

#### Qodobka 5aad

1. Qofka laga dhigaayo lacag maamule ama lacag qabte (cashiers and collector) waa inuu ahaado mid la habsabay hawl karnimadiisa iyo hufnaantiisa oo xaasna leh.

2. Qofka laga dhigaayo xisaabile (accountants) ama maqsiin haaye (store keeper) waa inuu shaado mid la habsaday hawl karnimadiisa iyo hufnaantiisa.

3. Marka lagu arko lagu tuhmo maamul xumo, daaca darro, aamin darro oo aanay taasi keenin dambi caadi ah, waa in laga wareejiyaa xilkaas go'aan edbi ahna lagu qaadaa.

#### Qodobka 6aad

Xilka xulashada lacag maamule, xisaahiye, maqaasiin haaye ama lacag qabta wuxuu saaranyahay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda ama Wakaaladda qofka la magacaabay tirsanyahay isagoo tixgelinaya qodobada sharcigan u dhigaayo.

#### Qodobka 7aad

Xoghayha Wasaaradda, Agaasimaha Guud ee Wakaaladda, Guddoonshaha Gobolka, Guddoonshaha Degmada, Maamulaha Laamaha Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka iwm. ee ku lug leh maamul lacageed, waa inaay sameeyaan jaangooyo kormeerid, illaalin iyo qorsheyn ulajeeddadeedu tahay in la daryeelo nabadgelyada Xoolaha Dawladda.

#### Qodobka 8aad

Qof kasta oo loo xilsaaray maamul lacageed ama hanti dawladeed waa inuu ku maamulo habka ku qoran sharciga iyo xeerka xisaabta lamb.

2 ee 29-12-1961 iyo lam. 317 ee 17-12-1962 iyo xeerka xannaanada alaabta lamb. 318 ee 18-12-1962 haddii aanay ka soo horjeedin qodobad-da sharcigan.

#### Qodobka 9aad

1. Qofka ka soo bixi waaya xilka sharcigani saaraayo, haddii aan dembi kala uga imaan, wuxuu muqteysanaysa ciqaabaha soo socda mi-dood:

- b) Shan (5) ilaa shan iyo toban (15) maalmood oo mushaharkiisa laga jaro, haddii xilgudashadiisa wax ka kala dhimanaadaan.
- t) Lix iyo toban (16) maalmood ilaa hal bil mashaarkeed oo laga jaro, haddii aanuu xilkii saarnaa waxba ka gudan.
- j) Hal bil wax ka badan ilaa lix bilood oo shaqada laga joojiyo, haddii ay xilkasrarridiisa ka dhibaata soo garta socodsiinta maamulka, ama dayacaadda iyo vannaana-xumada hantidii xilku ka saaray, ayadoon wasaaro kale gaarin.
- x) Ciqaabta ku dhigan xarafka (j) ay la socoto darajadiisa hoos loo dhigo ama shaqada oo laga eryo xaq la'aan, haddii xilkasdarrid-diisu gaarsiiso qasaaro weyn hantida Dawladda.

2. Qofkasta oo gaarsiya qasaaro lacag ama hanti kale oo dawladda, haddii aanu caddeyn inaanu sabab ku laheyn (forza maggiore), (caso fortuito, responsabilità altrui), waxa waajib ku ah inuu dawuladda u magdhabo dhammaan qasaaraha uu gaarsiiyay.

#### Qodobka 10aad

1. Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda waa inuu soo saaraa xeer ama amarro idaariya oo ku saabsan nidaam xisaabeed oo isku mid ah sammeenaayana hayadaha Dawladda oo dhan isagoo tixgelinaaya hay' adaha isku hal noqon kara unfied accounting and book keepin system).

2. Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda wuxuu soo saari karaa xeer faahfaahinaya sharcigan waxii ku saabsan maamulga hantida Dawladda iyo xubnaheeda.

#### Qodobka 11aad

1. Wax alla waxii ka luna xoolaha Dawladda ee ku yimaada dayacaad ama daryeelid la'aan xil u faraayo sharcigan waxaa mas'uul ka ah loona ciqaabi doona madaxda maamulka hawlaha Wasaaradda, Wakaa-ladda, Gobolka ama Degmada ee ku shaqo lahaa.

2. Dadka lagu tilmaamay qod. 7 ee sharcigan haddii waajibkooda ay gudan waayeen sida qodobadaasi dhigaayo, waxaa lagu qaadi doonaa ciqaabta lagu tilmaamay qodobka 9aad ee sharcigan, haddii dembi ka weyn aan jirin.

Qodobka 12aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda qodobadda sharcigan, ama aan la socon karin, waa la buriyay.

Qodobka 13aad

Sharcigan wuxuu dhagan gelayaa 30 maalmood ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 7 Juunyo 1975.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---



**BOGGA LABAAD**  
**XEER**

---

**XEER MADAXWEYNAHA SARE EE KACAANKA**

Tr. 25 Majio 1975, L. 80.

Magacaabidda Guddiomiyeyaasha Gobollada Galgaduud iyo Mudug — Sh. Dhexe iyo Nugaal.

**GUDDOONSHAHA**  
**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**ASAGOO ARKAY** Xaashida 1aad tii, 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969ka;

**ASAGOO ARKAY** Qodobka 7aad ee Sharciga lambarkhiisu yahay 52-72, soona baxay Seedii Juunyo 1967kii;

**ASAGOO TIXGELINAYEY** Taladii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

**ASAGOO OGAADAY** Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddoomiyeyaal Gobollada Galgaduud iyo Mudug. Shebeelada Dhexe iyo Nugaal

**WUXUU GOOYEY**

Qodobka 1aad

Laga bilaabo bishii Maarso 8eedi 1975ka, waxaa lagu magacaabay Sraakiisha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin inay Guddoomiyeyaal ka noqdaan Gobollada hortoda ku qoran:

Jaalle Yuusuf Macallim Ibrahim Guddoomiye Gobolka — Galgaduud  
» G. Dh. Xasan Cabdi Khayre Guddoomiye Gobolka — Mudug  
» G. Qaasim Xaaji Aaden Guddoomiye Gobolka — Nugaal  
» G. Dhexe Max. Xaaji Salax Guddoomiyey Gobolka — Sh. Dhexe

Qodobka 2aad

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa si degdeg ah, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**GUDDOONSHAHA**  
**GOLAHA SARE EE KACAANKA**  
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
*Jaalle S. Gaas Jaamac Moxamed Qaalib*

**WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

Tr. 28 Abri 1975, L. 80.

Magacaabid Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Shebeelaha Hoose.

**XOGHAYAHA DAWLADDA**

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juunyo 1972kii, lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1972kii, kuna saabsan Maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan lambar 12120, taariikh 13 Disembar 1972kii, ku saabsan magacaabidda Guddiyada Kacaanka Gobolka Benaadir;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha G. S. K. lamba 49 taariikh 8-2-1973kii, ku saabsan dhismo Gobollo iyo Degmooyin Cusub oo uu ka mid yahay Gobolko Shebeelaha Hoose;

ISAGOO OGAADAY Ineey lagama maarman tahay in la magacaabo Wakiiladda Beesha ee Guddiyada Kacaanka Degmooyinka Marka, Afgooye, Koryooley, Wanle Weyn iyo Barawe oo ka tirsan Gobolka Shebeelaha Hoose, iyadoo la waafajinayo qaantuunka ku qoran qodobka 10aad lambarkiisa 3aad xarafka (c) ee sharciga kor ku tilmaaman;


ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Shebeelaha Hoose;

**WUXUU XEERAY**

Qodobka 1aad

Magacaawga Guddiyada Kacaanka Degmooyinka Marka, Afgooye, Koryooley, Wanle Weyn iyo Barawe, qaybhooda Wakiilada Beesha.

Ka billaabanta 20-10-1974kii, Dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxan yihiin, waxaa loo magacaabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka Degmooyinka ay ku hoos qoran yihiin:



**DEGMADA MARKA**

1. Jaalle Xaaji Bashiir Cali (Qoslaaye);
2. » Xasan Siyaad Shuuriye;
3. » Dheere Boore Moxamed;
4. » Ciise Moxamuud Xasan;
5. » Sheekh Maxamed Sheekh Cabdi;
6. » Xabiib Abanuur Dheere;
7. » Salaad Daahir Guuleed;
8. » Cali Yaro Ibrahim;

9. » Faaduma Moxamed Caruush;
10. » Xasan Cumar Xasan;
11. » Moxamed Moxamuud Guule;
12. » Buuwe Siidii Cusmaan;
13. » Shariif Abuubakar Cali;
14. » Awees Sheekh Yuunis;
15. » Xaawa Aaden Muuse;
16. » Abyan Maxamed Nuux;
17. » Xalima Cali Bariise;

#### DEGMADA AFGOOYE

1. Jaalle Maxamed Axmed Saciid;
2. » Musdhafa Moxamed Xaaji;
3. » Yuusuf Cali Nuur;
4. » Isha Buuyoow Abuukar;
5. » Cabdilxamid Sheekh Muumin;
6. » Naasir Cawad Cabdalla;
7. » Qureysh Xasan Siyaad;
8. » Shariifa Nuur Wacays;
9. » Jamiila Maxamed Shaamow;
10. » Maryan Buule Ibrahim;
11. » Shukre Sheekh Axmed;
12. » Faaduma Axmed Calisow;
13. » Cusmaan Xuseen Cabdulle;
14. » Abuukar Mette Cali;
15. » Yaslam Cabdalla Cumar;
16. » Xaaji Abuukar Show Show;
17. » Mocallim Maxamed Caliyow;

#### DEGMADA QORYOOLEY

1. Jaalle Cusmaan Xaaji Cabdow;
2. » Salaad Cali Maxamed;
3. » Ducaale Ciise Maxamuud;
4. » Moxamuud Maxamed Aadan;
5. » Cadnaan Macallim Yuusuf;
6. » Moxamed Yuusuf Garaar;
7. » Cabdi Dhaay Maxamed Cusmaan;
8. » Nuur Maxamed Xasan;
9. » Maamoow Nuur Maamow;
10. » Aaden Caafi Illeed;
11. » Xaaji Moxamed Sheekh Cali;
12. » Sheekh Cali Cabdi;
13. » Istanbul Xaji Moxamed;
14. » Sheekh Cumar Xaaji Muuse;
15. » Aamina Xasan Cilmi;
16. » Maxamad Cawad Cabuud;
17. » Xabiiba Cali Cumar;

DEGMADA W. WEYN

1. Jaalle Cabdi Tooxow Culisow;
2. » Baale Baroow Biyey;
3. » Xaaji Gacal Maxamed Faarax;
4. » Moxamed Moxamuud Cabduraxmaan;
5. » Faracadde Faarax Warsame;
6. » Ibrahim Faarax Guuleed;
7. » Xaaji Cabdullahi Sheekh Ibrahim;
8. » Yuusuf Axmeed Mu<sup>x</sup>yiddiin;
9. » Khamar Cabdulqaadir Moxamed;
10. » Ardo Diiriye Faarax;
11. » Khadija Hamaan Ibrahim;
12. » Xaawa Xaaji Moxamuud Aaden;
13. » Maxamed Cusmaan Dhalxa;

DEGMADA BARAAWE

1. Jaalle Shariff Taaha Abuubakar;
2. » Moxamed Maxamuud Xabiibi;
3. » Moxamed Axmed Raage;
4. » Madariini Cabdi Nuur;
5. » Moxamed Gaduudo Cusmaan;
6. » Sayidiina Xaajiyoow Nuur;
7. » Shariif Qulateen Ma<sup>x</sup>amed;
8. » Moxamed Munye Qaasim;
9. » Sayidiina Cali Maxamed;

Qodobka 2aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani wuxuu dhayqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974ka, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 28 Abbril 1975.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

*Diiwaanka Lamb. 1, Bogga lamb. 75.*

*Muqdisho, 6 Majio 1975.*

*Hantidhawraha Guud*

*G. Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur*

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

Tr. 24 Majjo 1975, L. 81.

Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Bakool.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juunyo 1972, lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1972kii, ku saabsan Maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka lambarkiisu yahay 102, tqriikh 26-9-1973, ku saabsan dhismaha Gobollada: Bay, Gedo iyo Bokool;

ISAGOO ARKAY Xeerkarka Lambarradoodu yihiin 12123, ADM-6-5-768, ADM-6-5-762, 25 - ADM-6-5-3592, 26 - ADM-6-5-3592, ku kala taariikhsan 13-12-1972 - 1-1-1974kii 23-7-1974ka, kuna saabsan Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Xudur, Yeed, Waajid, Ceelbarde iyo Teyeeglo qaybahooda Wakiilada Beesha;

ISAGOO OGAADAY Iney lagama maarmaan tahay in la cusbooneysiyo Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka: Xuddur, Yeed, Waajid, Ceelbarde iyo Teyeeglow, iyadoo la waafajinaayo qaanuunka ku qoran Qodobka 10aad lambarkiisa 3aad, Xarafka (c) ee sharciga kor ku tilmaaman;

ISAGOO TIXGELINAYO Talada uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Bakool.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Magacawga Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Xuddur, Yeed, Waajid, Ceelbarde iyo Teyeeglo qaybahooda Wakiilada Beesha.

Ka bilaabanta 20-10-1974kii, Dadka Magacyadoodu halkan hoose ku taxan yihiin; waxaa loo magacaabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ay ku hoos qoran yihiin:

DEGMADA XUDDUR

1. Jaalle Salaad Xasan Aaden;
2. » Sheekh Cali Moxamed Cabdiraxmaan;
3. » Sheekh Moxamed Kariin Sheekh;
4. » Cabilcasiis Cartan Nuur Warsame;
5. » Maxamed Saalax Xabiibo;
6. » Iimaan Diyaad Qaasim;
7. » Awliya Maxamed Yarow;

8. » Moxamuud Sheekh Cali;
9. » Cabdalla Axmed Muxsin;
10. » Khadija Cabdullahi Xaashi;
11. » Xaawo Maxamed Cali;
12. » Maryan Axmed Cadaawe;
13. » Faaduma Yuusuf Cumar;
14. » Cabduraxmaan Cabdolw Moxamed;
15. » Cabdullahi Moxamuud Liibaan;
17. » Sheekh Xasan Mursal.

#### DEGMADA YEED

1. Jaalle Maxamed Naasir Cabdi Maxamed;
2. » Jaamac Mursal Diiriye;
3. » Maxamed Cabdi Waaxid;
4. » Guture Saalax Cali;
5. » Maryan Jaamac Guuleed;
6. » Faaduma Bulshaale Moxamuud;
7. » Haweeya Keynaan Cowl;
8. » Cabdulqaadir Maxamed Cabdulle;
9. » Shukri Cabdi Baaji.

#### DEGMADA CEELBARDE

1. Jaalle Sheekh Maxamed Xuseen Cali;
2. » Cumar Sooyaan Xasan;
3. » Sheekh Maxamed Aaden «Coomey»;
4. » Sheekh Qaasim Aw Cabdi;
5. » Cabdi Xalane Cabdi;
6. » Cusmaan Xaaji Khaliif;
7. » Maxamuud Xareed Faarax;
8. » Xaajiya Xaawo Cadar;
9. » Xafida Sahal Samatar.

#### DEGMADA TIYEEGLO

1. Jaalle Macallim Ibrahim Sheekh Axmed;
2. » Macallim Isaaq Cali Xasan;
3. » Salaad Xuseen Nuur;
4. » Cali Axmed Saalax;
5. » Xabiiba Caynab Moxamed;
6. » Aaden Nuur Ciise;
7. » Xasan Xuseen Duqoow;
8. » Cabdiyooow Isaaq Macallim Maxamed;
9. » Warsame Cabdi Yaroow.

DEGMADA WAAJID

1. Jaalle Cali Aaden Amiin;
2. » Maxamed Kheer Cabdalla;
3. » Isaaq Ibraahim Cibraah;
4. » Xaawa Maxamuud Aaden;
5. » Xadra Sheekh Cabdi;
6. » Sheekh Isaaq Xuseen;
7. » Cabdullahi Xaaji Cusmaan Jirac;
8. » Aaden Moxamed Cali;
9. » Faarax Xuseen Cali.

Qodobka 2aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974kii, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 24 Maajio 1975.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

**WAAN AREGNAY EE DIIWAANGELINNAY**

*Diiwaanka Lamb. 1 Bogga Lamb. 83.*

*Muqdisho, 1 Juunyo 1975.*

*Hantidhawraha Guud*

G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

Tr. 19 Oktoobar 19767, L. 83.

**Concessione di area di terreno demaniale a favore dei Signori Abdullahi Mohamud e Farah Sugulle Samantar.**

**IL MINISTRO**

VISTI gli articoli n. 77 e n. 83, secondo comma della Costituzione;

VISTO il D. L. 7 Febbraio 1965, n. 1, «modificazione alla Legge 3 Giugno 1962, n. 14» relativa all'Ordinamento del Governo;

VISTO il D.P.R. 23 Maggio 1961, n. 144;

VISTO l'Ordinanza n. 5 del 12 Aprile 1950;

VISTA la domanda in data 5-8-1961, presentata dai Signori Abdullahi Mohamud Hasan e Farah Sugulle Samantar intesa ad ottenere in concessione a scopo edilizio un appezzamento di terreno demaniale sito in Mogadiscio — in Valle Nord — Ricade nella zona VI Periferica Transitoria;

CONSIDERATO che l'avviso ad opponendum riguardante l'area di terreno richiesta e' rimasto affisso a termini di legge all'albo del Municipio di Mogadiscio, ed e' stato pubblicato sul Bollettino Ufficiale della Somalia Suppl. n. 1 al n. 1 del 31 Gennaio 1962, senza opposizione da parte di terzi;

VISTO il progetto concernente la costruzione di un edificio in muratura che e' stato approvato dalla Commissione Edilizia Municipale di Mogadiscio nella sua 296° seduta del 1-10-1962;

VISTA la Bolletta n.23311 in data 21-3-1964, dell'Ufficio Tasse sugli Affari attestante che i Signori Abdullahi Mohamud Hasan e Farah Sugulle Samantar hanno pagato la somma di Sh. So. 2.700, quale prezzo di cessione dell'area di terreno richiesta in concessione a scopo edilizio;

CONSIDERATO che l'area di terreno richiesta di mq. 2.700, e' stato consegnato ai Signori Abdullahi Mohamud e Farah Sugulle Samantar, come si rileva dal verbale redatto dal Servizio Tecnico Erariale in data 26 Settembre 1964;

VISTO il disciplinare di concessione edilizia e la planimetria che lo integra;

**DECRETA:**

E' concesso a scopo edilizio ai Signori Abdullahi Mohamud Hasan e Farah Sugulle Samantar l'area di terreno demaniale di mq. 2.700, sito in Mogadiscio, in Valle Nord, di cui alla planimetria allegata e alle condizioni contemplate nell'unito disciplinare che si approva e si rende esecu-



tivo, stipulato in data 18 Ottobre 1967, fra il Governo rappresentato dal Ministro dei LL. PP. e gli interessati Signori Abdullahi Mohamud Hassan e Farah Sugulle Samantar.

Mogadiscio, li19 Ottobre 1976.

IL MINISTRO  
*Mohamud Abdi Nuur*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 60.*

*Mogadiscio, li 6 Novembre 1967.*

*Il Magistrato ai Conti:*

Mohamed Ahmed Abdilleh

---

KEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 19 Maajo 1975, L. 84.

Dhul Dowladeed la siiyay gacantana loo geliyay (Libera Disponibilità) Jaalle Sheekh Xasan Hamuud Cabdi, kuna yaal magaaladda Baydhabo.

#### XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqadii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer 41 soona baxay 1 Novembre 1973;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 50 soona baxay 26 Jennayo 1964;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed L. 31 ee Reb. taarikhda markay aheyd 27 Agosto 1974 laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladdu L. 4 R. 2 ee 28-2-1975, taas oo lagu siiyey Jaalle Sheekh Xasan Hamuud Cabdi cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiga mq. 525,60, kuna yaal Baydhabo;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda guriga, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay hore u aqoonsaden Wasaaradda Hawlaha Guud. Waaxada Farsamad Dhulka, taarikhdeeduna aheyd 5-1-1975;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Bay, taarikhdeedun aheyd 15-2-1975 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Waaxda Farsamada dhulka, ay waafaqsan tahay guriga;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Baydhabo laguna siiyay xaashid Lamb. 49-XGG-75 ee 3-2-1975 oo siisay Xafiiska Caafimaadka Guud Gobolka Baydhabo;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waa-jib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladeed (Libera Disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis. wuxuu soo saaray.

**X E E R**

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Shêekh Xasan Hamuud Cabdi, dhul ku fahdiya mq. 525,60, kuna Baydhabo.

Muqdisho, 10 Maajio 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud  
*Jnj. Maxamed Xawaadle Madar*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY**  
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 14.*  
*Muqdisho, 15 Maajio 1975.*  
*Hantidhawraha Guud*  
G. Dhexe Cabdillaahi Wasaame Nuur

---

**BOKAA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSII IYO WIXII LA MID AH**

---

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

---

**GARSOORUHU**

Hadduu arkay weydiisadka dhinaca kale ku qoran markuu arkay waxdiiska ku saabsan Jeegga lumay iyo ogeysiika Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;  
Hadduu arkay 69 D. L. 9-9-65 N. 2;

**WUXUU CADEYNAAYAA**

Lumadda Buugga lacagta (ammortamento libretto) L. 3226.4 ku dhiganna Sh. So. 2098 (labagun iyo sagaashan iyo sideed).

**WUXUU ARAAYAA**

In loo sameeyo buugga gabdha la yirahdo Xadiya Nuur Kaahiye, muddo 30 beri ah laga bilaabo maalinta lagu shaaciyay Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, haddi aanan qof kale wax ku soo sheegan lacageed. Waxaa kalco la codsanaayaa in buugaas gacanta laga saaro gabdha magaceedu kor ku qoran yahay ama qof ka sita wakaalad sharci ah isla gabdhaas ayadoo la sugaayo sodonkaas beri ee kor ku qoran.

Xamar, Tr. 4-6-1975.

**Garsooraha Maxkamadda G.**

*Dr. Yaasiin Shire Faarax*

NUCLEARE SOMALA — S. p. A.

---

Sida waafagsan iyo sida u dhigaayo gobolka L. yahay 2385 oo sharciga madan.

WAXAAN IDIN SHAGEEYNA

In Ururka Maamulka shinkadda Nucleare Somala S.p.A. oo saldhigeedu yahay Xamar oo ah lacagta asaaska (Capitale Sociale) 1.000.000, oodhamaan la baxsahy (interamente versato) oo ku dhigan diiwaangelinta Maxkamadda Gobolka Benaadir L. 796 bugaa shirkadaha; waxey ka kooban yiihin:

Ing. Emilio Pacchiarotti — Guddomye  
Dott. Mario Scarpa — Guddomye ku-xigeen  
Dott. Manuel D'Angnolo  
Ing. Adolfo Turchi  
Ing. Bruno Cimino.

Waxaana u dhamaaday seddax sano isla markanna Ururka Guud ee maalka leh fadhigii 21kii Abril 1975, wey u cusbooneysiyeen seddax sannadood oo kale ahna 1975 - 1976 - 1977.

(94)

p. Guddiga Baarista  
*Rag. Renzo Guidi*

---

NUCLEARE SOMALA — S. p. A.

---

Ai sensi e per gli effetti dell'Art. 2385 del Codice Civile:

SI COMUNICA

che il Consiglio di Amministrazione della **NUCLEARE SOMALA Società** per Azioni con sede in Mogadiscio e capitale **Shs. So. 1.000.000** interamente versato, iscritta al Tribunale di Mogadiscio n. 796, Registro Società, composto dai Sigg.

Ing. Emilio Pacchiarotti — Presidente  
Dott. Mario Scarpa — Vice Presidente  
Dott. Manuel Dagnolo  
Ing. Adolfo Turchi  
Ing. Bruno Cimino

e' cessato per compiuto triennio e che l'Assemblea Generale degli Azionisti del 21 Aprile 1975 li ha riconfermati per il triennio 1975 - 1976 - 1977.

Mogadiscio, 20 Maggio 1975.

SOMALI AIRLINES — S. p. A.

---

A V V I S O

DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli azionisti della Somali Airlines S.p.A. sono convocati in Assemblée Ordinaria in Mogadiscio presso la sede sociale in Piazza del Parlamento, per il giorno 30 Giugno 1975 alle ore 17.00 in prima convocazione e, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 8 Luglio 1975 alla stessa ora e nello stesso luogo, per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale.
2. — Presentazione del Bilancio e del Conto Profitto e Perdite al 31-12-1974 e deliberazione relative.
3. — Nomina di un Amministratore.

Possono intervenire i Soci che risultino iscritti nel libro Soci ed abbiano effettuato il deposito delle azioni. Per l'intervento in Assemblée le azioni potranno essere depositate almeno 5 giorni prima, presso la cassa sociale presso il Banca di Roma, Roma.

Mogadiscio, 15 Giugno 1975.

p. Il Consiglio di Amministrazione  
IL PRESIDENTE

(95)

---

SOMALI AIRLINES — S. p. A.

---

OGYEYSIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAA DI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikadda SOMALI AIRLINES - S. p. A. waxaa la weydiisanayaa inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono saldhigga Muqdisho, maalinta 30iia Junyo 1975, saacaddu markay tahay 17ka galabnimo. Haddii shirkaaso suura geli waayo maalinta 30ka waxa mar labaad laysu imaan doonaa 8da Lulyo saacaddu markay tahay 17ka galabnimo.

Waxyaabaha shirka lagaga wada hadli doonaa waxaa weeye:

1. — Xogwarrankii ay soo sameeyeen Guddiga Maamulka Guud iyo kii ay soo sameeyeen Guddiga Baarayaasha.
2. — La horkeeno miisaaniyadda iyo xisaabihii khasaaraha iyo maacaashka oo ku eg 31-12-1974 iyo go'aanada laga gaadhi doono.
3. — Magacaabid qof ah maamule.

Waxaa loo ogolyahay inay ka soo qaybgalaan shirka dadka wax leh

Sharcikadda, ee ku qoran ~~hugga~~ rasmiga ah ee Dadka Qaybaha Shar-  
kadda ku lehi ay ku qoran yihiin, ee isla markaana dhiibey qaybohoodii.

Si ay uga qayb qaadan kaaraan Shirkan, waa in dadka qaybaha lehi  
ay dhigaan qaybohoodii khasnadda Skarikadda amase Baanka la yidhaah-  
do «BANCO DI ROMA» ee Rooma ah( 5 maalmood shirka ka hor.

(95 Ku-celi)

GUDDIGA MAAMULKA GUUD  
*Somali Airlines*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

---

Arjiile Lamb. 2-75, Maxamuud Yusuf Cilmi Jaamac iyo Bankiga  
Ganacsiga Ummadda, Hargeysa.

AMAR (XEER)

Labada Magac ee kor ku qoran waxay Maxkamadda hor keeneen  
sida ku qoran hoos.

1. Maxamuud Yusuf Jaamac wuxuu Maxkamadda keenay Arji u  
ku caddaynaayo in jeeg wareegto ah kuna qoran yahay Magaciisa, Lamb.  
25.902, lana sameeyay taariikhdu markay ahayd 13-2-1975 ka lumay  
markay taariikhdu ahayd 23-3-1975, Baanka iyo Saldhigyadda Booliskana  
Ogeysiiyay, wuxuuna codsaday in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Daw-  
ladda.

2. Baanka Ganacsiga Ummadda Laanta Hargeysa, Isaguna Maxka-  
madda wuxuu keenay taariikhdu markay ahayd 5-4-1975 warqad lam-  
barkeedu yahay 2.201 taas uu ku cadaynaayoin uu lumay jeeg wareegto  
ah (J-W LR. 25.902) kuna qoran tahay lacag dhan 11.000. Jeegaas oo  
ku qoran Maxamuud Yusuf Jaamac lagana sameeyay Baanka Ganacsiga  
Laanta Hargeysa 13-2-1975, ninka Jeega ku qoranna uu ogeysiiyey  
26-3-1975; Laanta Baanka ee Burco Laanta oo ayadduna faafisay joo-  
jinta bixinta lacagta ku qoran jeegaas isaga ah 26-3-1975 kuna faafisay  
warqadda Lambarkeedu yahay 934 illa 5-4-1975, wax war ahna aan laga  
hayn Jeegaas.

Siddaas darteed markii aan eegay waxyaabaha kor ku qoran iyo  
markii arkay Qod. 27 Xeerka Lamb. yahay 2 soona baxay 9-9-65 iyo  
Qod. Lamb. 69 isla Xeerkaas. Waxaa la AMRAYAA.

1. In uu socon karin Jeega Lamb. kor ku qoran yahay laga bilaabo  
Maanta.

3. In lacagtaas ah Shs. 11.000. Bankigu siiyo Arjiilaha Magaciisu ujeeddada ku qoran yahay muddo ku siman shan iyo toban (15) casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

La qoray Maanta, 8-4-1975, Hargeysa.

*Xuseen Axmed Cabdillahi*

Ku Simaha Guddoomiyaha Maxkamadda

(95 *Ku-celi*)

Gobolka ee Hargeysa

---

### S A X I D

Faafinta Rasmiga ah ee Lamb. yahay 6 ee 1 Junyo 1975 waxaa loo akhridoonaa tirada Lamb. Bogga u horeya 459 wuxuuna ku dhammaan-doona (Bogga u dambtya) Lamb. 474.

Kaasoo beddelay Lamb. 449 ilaa 462.